TAGTO	1k. ahaa 2k. ahayd 3k.l. ahaa 3k.dh. ahayd 1w. ahayn 2w. ahaydeen 3w. ahaayeen	ma ahayn	
AMAR	ahow ahaada		
MASDAR	ahaan		

Hab madhacdo

## LEEYAHAY

		QAAB DIIDMO	QAAB GAABAN
JOOGTO – HAB GUUD	1k. leeyahay 2k. leedahay 3k.l. leeyahay 3k.dh. leedahay 1w. leenahay 2w. leedihiin 3w. leeyihiin	1k. ma lihi 2k. ma lihid 3k.l. ma laha 3k.dh. ma laha 1w. ma lihin 2w. ma lihidin 3w. ma laha	leh
TAGTO	1k. lahaa 2k. lahayd 3k.l. lahaa 3k.dh. lahayd 1w. lahayn 2w. lahaydeen 3w. lahaayeen	ma lahayn	
AMAR	lahow lahaada		
MASDAR	lahaan		

## YAALLAA

JOOGTO	1k. aallaa / aal 2k. taallaa / taal 3k.l. yaallaa / yaal 3k.dh. taallaa / taal 1w. naal <sup>n</sup> aa / naallaa / naal 2w. taallaan (taalliin) 3w. yaallaan (yaalliin)
TAGTO	1k. aallay / iil / iillay 2k. taallay / tiil / tiillay 3k.l. yaallay / yiil / yiillay 3k.dh. taallay / tiil / tiillay 1w. naallay / niil / niillay 2w. taalleen / tiilleen 3w. yaalleen / yiilleen
AMAR	(aal) (aalla)
MASDAR	oolli (aalli)

## YAQAANNA

JOOGTO	1k.	aqaannaa	/ aqaan
	2k.	taqaannaa	/ taqaan
	3k.l.	yaqaannaa	/ yaqaan
	3k.dh.	taqaannaa	/ taqaan
	1w.	naqaannaa	/ naqaan
	2w.	taqaannaan	/ taqaanniin
	3w.	yaqaannaan	/ yaqaanniin
TAGTO	1k.	aqaannay	/ iqiin / iqiinnay
	2k.	taqaannay	/ tiqiin / tiqiinnay
	3k.l.	yaqaannay	/ yiqiin / yiqiinnay
	3k.dh.	taqaannay	/ tiqiin / tiqiinnay
	1w.	naqaannay	/ niqiin / niqiinnay
	2w.	taqaanneen	/ tiqiinneen
	3w.	yaqaanneen	/ yiqiinneen
AMAR		(aqow)	
		(aqaada)	
MASDAR		aqoon	

## YIMAADDAA

JOOGTO	1k. imaaddaa 2k. timaaddaa 3k.l. yimaaddaa 3k.dh. timaaddaa 1w. nimaadnaa 2w. timaaddaan 3w. yimaaddaan
TAGTO	1k. imid / imi 2k. timid / timi 3k.l. yimid / yimi 3k.dh. timid / timi 1w. nimid / nimi 2w. timaaddeen 3w. yimaaddeen
AMAR	kaalay / imow kaalaya / imaada
MASDAR	iman / imaan
SOCOTO	imanayaa / imaanayaa imanaysaa / imaanaysaa imanayay / imaanayay imanaysay / imaanaysay

## YIRAAHDAA

JOOGTO	1k.	iraahdaa	/ idhaahdaa
	2k.	tiraahdaa	/ tidhaahdaa
	3k.l.	yiraahdaa	/ yidhaahdaa
	3k.dh.	tiraahdaa	/ tidhaahdaa
	1w.	niraahnaa	/ nidhaahnaa
	2w.	tiraahdaan	/ tidhaahdaan
	3w.	yiraahdaan	/ yidhaahdaan
TAGTO	1k.	iri	/ idhi
	2k.	tiri	/ tidhi
	3k.l.	yiri	/ yidhi
	3k.dh.	tiri	/ tidhi
	1w.	niri	/ nidhi
	2w.	tiraahdeen	/ tidhaahdeen
	3w.	yiraahdeen	/ yidhaadheen
AMAR	dheh dhaha		
MASDAR	oran / odhan		
SOCOTO	oranayaa / odhanayaa oranaysaa / odhanaysaa oranayay / odhanayay oranaysay / odhanaysay		



# Abuuridda falalka

---

## Abuuridda falalka dibgale la'aan

Jiraalaha iyo falku waxa ay leeyihin bu' isku mid ah.

JIRAALE	FAL	
beer-ta	beer-aa	
ciyaar-ta	ciyaar-aa	
hees-ta	hees-aa	
saf-ka	saf-aa	
tartan-ka	tartam-aa, tartan-taa	(m ~ n)

## Dhammaadka -taa/-daa, -ataa, -anayaa

(Auto-bene-factive verbs; Falal isuroone ah (??))

subjektet får själv nytta av handlingen

-t- auto-bene-faktiva verb

gör något bra för sig själv

## Kooxda 3aad

Yeeluhu hawsha naftiisa ayaa uu isu qabanayaa.

beeraa, beerayaa		beertaa,	beerataa,	beeranayaa
baraa, barayaa		bartaa,	barataa,	baranayaa
akhriyaa, akhrinayaa		akhristaa,	akhrisataa,	akhrisanayaa
fiiriyaa, fiirinayaa		fiirsadaa,	fiirsataa,	fiirsanayaa
iibiyaa, iibinayaa		iibsadaa,	iibsataa,	iibsanayaa
joojiyaa, joojinayaa	(g ~ j)	joogsadaa,	joogsataa,	joogsanayaa
kariyaa, karinayaa		karsadaa,	karsataa,	karsanayaa
kaaliyaa, kaalinayaa	(l ~ sh)	kaashadaa,	kaashataa,	kaashanayaa
xannaanee!		xannaaneyso!		
dhis !		dhis!		
akhri!		akhriso!		

bar!

baro!

Wuu bar-aa xisaabta.

Way bar-taa xisaabta.

Wuu bar-t-aa xisaabta.

Way bar-a-taa xisaabta.

bar-t-taa

barat-taa

barataa

wuu tum-aa

way tun-t-aa

wuu tun-t-aa

way tum-a-taa

gabarta buu u shanleeyaa

gabarta bay u shanleysaa

wuu shanley-st-aa

way shanley-sa-taa

wuu beeraa wuu beer-ayaa

way beertaa way beer-aysaa

wuu beer-t-aa wuu beer-a-nayaa

way beer-a-taa way beer-a-naysaa

wuu akhriyaa

way akhrisaa

wuu akhri-st-aa wuu akhri-sa-nayaa

way akhri-sa-taa

wuu iibiyaa

way iibisaa

wuu iib-sad-aa

way iib-sa -taa

wuu ordaa

way oroddaa

Guri bay dhiseen.

Guri bay dhisteem.

## Fal gudbe iyo fal magudbe

Fal-**magudbe** layeele ma laha.

*Koobku waa uu jabay.*

*Faarax waa uu dhoofayaa.*

Fal-**gudbena** layeele waa uu leeyahay.

*Anigu waxa aan jebiyay koobka.*

*Cali Faarax buu dhoofinayaa.*

## Dhammaadka -maa, -antaa, -mayaa

Qaabka leh dibgalaha **-m-** waa qaabka fale-la'aanta ee falka.

FALGUDBE	FALMAGUDBE (leh <b>-m-</b> )
furaa, furayaa	fur <b>maa</b> , fur <b>mayaa</b>
milaa, milayaa	mil <b>maa</b> , mil <b>mayaa</b>

qaab dheddig:	furm-taa	> furam-taa	> furantaa
		rmt > ramt	mt > nt
		(saddex shibbane)	(shibbane hortiisa)

Falgudbe: *Wiilku albaabka ayaa uu furay.* (yeeluhu waa fale)

*Biyaha kululi dhaqso ayaa ay wax u milaan.*

Falmagudbe: *Albaabku waa uu furmay.* (yeeluhu ma aha fale)

*Sonkortu waxa ay ku milmaysaa biyaha.*

## Dhammaadka -siiyaa, -siisaa, siinayaa

Qaabka leh dibgalaha **-sii-** waa qaabka yeelsiinta ee falka.

FAL GUDBE	FAL LABAGUDBE
cabbaa, cabbayaa	cab <b>siiyaa</b> , cab <b>siisaa</b> , cab <b>siinayaa</b>
daremaa, daremayaa	dareen <b>siiyaa</b> , dareen <b>siisaa</b> , dareen <b>siinayaa</b>
fahmaa, fahmayaa	faham <b>siiyaa</b> , faham <b>siisaa</b> , faham <b>siinayaa</b>

FAL MAGUDBE  
hadlaa, hadlayaa

FAL GUDBE  
hadal**siiyaa**, hadal**siisaa**, hadal**siinayaa**

haleelaa, haleelayaa  
socdaa, soconayaa

haleelsiiyaa, haleelsiisaa, haleelsiinayaa  
socodsiiyaa, socodsiiisaa, socodsiiinayaa

*Faadumo carruurta ayaa ay ciyaarsiisay.  
Maxaa socodsiiyey doonnidii shiraaca ahayd?*

## Dhammaadka -iyaa, -isaa, -inayaa

kausativa verb

dhoofiyaa – dhoof-i-y-aa

dhoof rot

i avledningsändelse / ordbildningsändelse

y buffertkonsonant mellan två vokaler

aa böjningsändelse : presens

dhoofinayaa – dhoof-i-n-ay-aa

dhoof rot

i avledningsändelse / ordbildningsändelse

n böjningsändelse : infinitiv

ay böjningsändelse : progressiv

aa böjningsändelse : presens

FAL MAGUDBE

aadaa, aadayaa

buuxaa, buuxayaa

dhoofaa, dhoofayaa

guuraa, guurayaa

karaa, karayaa

maraa, marayaa

qalloocaa, qalloocayaa

uraa, urayaa

jabaa, jabayaa

galaa, galayaa

FAL GUDBE

aaddiyaa, aaddinayaa

buuxiyaa, buuxinayaa

dhoofiyaa, dhoofinayaa

guurinyaa, guurinayaa

kariiyaa, karinayaa

mariiyaa, marinayaa

qalloociyaa, qalloocinayaa

uriyaa, urinayaa

jebiyaa, jebinayaa

geliyaa, gelinayaa

(a > e)

baxaa, baxayaa  
dhaca, dhacayaa

bixiyaa, bixinayaa (a > i)  
dhiciyaa, dhicinayaa

JIRAALE

kulayl  
nadiif  
qabow

FAL GUDBE

kulayliyaa, kulaylinayaa  
nadiifiyaa, nadiifinayaa  
qaboojiyaa, qaboojinayaa (w ~ j)

**-iyaa** ama **-shaa**, t.a.

ururiyaa ~ ururshaa

## Dhammaadka -eeyaa, -aysaa, -aynayaa

JIRAALE	FAL MAGUDBE
casho	cash <b>ee</b> yaa, cash <b>ay</b> nayaa
cunto	cunt <b>ee</b> yaa, cunt <b>ay</b> nayaa

*Bisaduhu maxay habeenkii ku casheeyeen?*

JIRAALE	FAL GUDBE
qiime	qiim <b>ee</b> yaa, qiim <b>ay</b> nayaa
sonkor	sonkor <b>ee</b> yaa, sonkor <b>ay</b> nayaa
wasakh	wasakh <b>ee</b> yaa, wasakh <b>ay</b> nayaa

SIFO	FAL GUDBE	
adag	adk <b>ee</b> yaa, adk <b>ay</b> nayaa	(ee ~ ay)
cad	cadd <b>ee</b> yaa, cadd <b>ay</b> nayaa	
dheer	dheer <b>ee</b> yaa, dheer <b>ay</b> nayaa	
fog	fog <b>ee</b> yaa, fog <b>ay</b> nayaa	
kulul	kulul <b>ee</b> yaa, kulul <b>ay</b> nayaa	
fudud	fudud <b>ee</b> yaa, fudud <b>ay</b> nayaa	
weyn	weyn <b>ee</b> yaa, weyn <b>ay</b> nayaa	
yar	yar <b>ee</b> yaa, yar <b>ay</b> nayaa	

*Fallaaraha qorraxdu waxa ay kululeeyaan biyaha dhulka dul yaalla.*



## Dhammaadka -oobaa, -owdaa, -oobayaa

### JIRAALE

baraf

biyo

col

duug

oday

tuug

wasakh

gabow

run

sifo

xor

### FAL MAGUDBE

baraf**oob**aa, baraf**owd**aa, baraf**oob**ayaa

biy**oob**aa, biy**owd**aa, biy**oob**ayaa

coll**oob**aa, coll**owd**aa, coll**oob**ayaa

duug**oob**aa, duug**owd**aa, duug**oob**ayaa

oday**oob**aa, oday**owd**aa, oday**oob**ayaa

tuug**oob**aa, tuug**owd**aa, tuug**oob**ayaa

wasakh**oob**aa, wasakh**owd**aa, wasakh**oob**ayaa

gaboobaa

rumoobaa

sifoobaa

xoroobaa

## Dhammaadka -oodaa, -ootaa, -oonayaa

### JIRAALE AAN MUUQAN

caro

cadho

cidlo

dhib, dhibaato

gaajo

### FAL MAGUDBE

car**ood**aa, car**oot**aa, car**oon**ayaa

cadh**ood**aa, cadh**oot**aa, cadh**oon**ayaa

cidl**ood**aa, cidl**oot**aa, cidl**oon**ayaa

dhib**t**oodaa, dhib**t**ootaa, dhib**t**oonayaa

gaaj**ood**aa, gaaj**oot**aa, gaaj**oon**ayaa

## Dhammaadka -aadaa, -aataa, -aanayaa

### SIFO

adag

dheer

kulul

ladan

### FAL MAGUDBE

adk**aad**aa, adk**aan**ayaa

dheer**aad**aa, dheer**aan**ayaa

kulul**aad**aa, kulul**aan**ayaa

ladn**aad**aa, ladn**aan**ayaa

# Abuuridda jiraalayaasha

---

## Jiraale faleed

FAL	JIRAALE FALEED	
	QAAB SALEED   -id, -is, -in, -asho, -aan, -niin, -tin...	
abuuraa	abuur	abuur <b>id</b>
digaa		dig <b>id</b> , dig <b>niin</b>
boodaa		bood <b>id</b> , bood <b>is</b> , boot <b>in</b>
jabaa	jab	jab <b>id</b> , jab <b>niin</b>
qoslaa	qosol	qosl <b>id</b> ,
tartamaa	tartan	tartam <b>id</b> ,

## Jiraale fale

FAL	JIRAALE FALE/YEELE		SHAY/QALAB
	LAB	DHEDDIG	
adeegaa	adeeg <b>e</b>	adeeg <b>to</b>	
furaa			fure <b>e</b>
(kalkaalaa)	kalkaali <b>e</b>	kalkaal <b>iso</b>	
kariyaa	kariy <b>e</b>	kar <b>iso</b>	
qoslaa	qosl <b>e</b>		

# Weeraynta

---

Weer gaabani waxa ay inta badan ka kooban tahay saddex qaybood:  
qurubweereed, yeele iyo khabar.

Waa ay ordayaan.

Waa uu hurdaa.

Waa aan qoslayaa.

Waa ay timid.

Badanaa qurubweereedku waa erayga 'waa'.

Marar badan yeeluhu waa qofka ama xayawaanka wax qabanaya.

Khabarku waa wixii uu qofkii ama xayawaankii qabanayo.

## Shanta xubnood ee weeraha

Y Yeele

Q Qurub weereed

Kh Khabar

L Layeele

Fk Falkaab

Yeele, layeele, falkaab waa magac ama magacuyaal.

## Falkaabka

Falkaabyadu waa noocyo fara badan:

### WAKHTI

Marka hore dumarku waxa ay dhisaan dhigaha iyo udbaha.  
Dhar kala duwan baa aynu xirannaa xilliyada kala duwan.  
Goorma ayaa aad nadiifisaa gurigiinna?

### MEEL

Waxa ay guriga saaraan raro, kebed iyo jarco.  
Maxamed waxa uu ku dhashay magaalada Marka.  
Waxa uu ku nasanayaa barandaha gurigiisa.  
Waxa aynu guryaha ku cunnaa cunto kala duwan.  
Waxa ay kalluun ku iibinaysaa suuqa dhexdiisa.  
Ilmuhu waxa uu ku socdaa xagga birjikada.  
Waxa uu ka shaqeeyaa dukaanka.  
Iyadu waxa ay aaddaa dugsiga.  
U baxa dibedda.  
Halkee baa aad ku riddaa qashinka?  
Halkee baa aad seexataa?  
Max-aa aad ku arki kartaa sawirka?  
Badda ayaa uu kalluun ka soo dabanayaa.  
Ciyaartu waxa ay ina gelisaa farxad.  
Wiilku waxa uu jeebka geliyaa lacag.  
Cuntadu waxa ay jidhkeenna gelisaa caafimaad.  
Dadka qaar baa cuntada ku karsada madbakha.  
Intee walxood baa la -ga helaa gurigiinna?  
Ha dhex-gelin bareesada qalin-qori ama xarig.

### SI

Biyaha waxa aynnu u adeegsannaa siyaabo kala duwan.  
Guryaha reer guuraaga si fudud baa la -u dhisi karaa.

DARAJA / HEER (grad)

Daaqaddu aad ayaa ay u yar tahay.

GUDDOOME (recipient, mottagare)

Wiilku waxa uu ina siiyey lacag.

Cuntadu xoog baa ay ina-u yeeshaa. (ina+u > inoo)

FAA'IIDAYSTE (beneficient, den som drar nytta)

Waxa uu aabbihii u tolayaa shebekad kalluun.

QALAB (redskap)

Shebaagta waxa uu ku soo dabtaa kalluun.

Waxa uu gaaridameerka ku qaadaa jawaannada culus.

Cali waxa uu ku ciyaarayaa bareesada.

Hooyadu qashin ayaa ay ku guraysaa teneg.

Axmed waa uu is-ku goyn karaa mindida.

Dad tiro yar baa wax ku karsada makiinadda korontada.

ALAAB (material)

Derbiga waxa la-gu dhisay laamo.

IL/ISIR (ursprung)

Xooluhu waxa ay ka helaan cunto geedaha iyo dhirta.

Xoolaha waxa aynu ka helnaa walxo badan.

UJEEDDO/HADAF (syfte)

Max-aa aan dabka u adeegsannaa?

Max-aa ay dadku u dhaqdaan xoolahan?

WEHEL YEEL (sällskap)

Y-aa aad la ciyaartaa?

SABAB (orsak)

xxxxxxxxxxxxxxxxxxxxxx

## Kaalmaha Xubnaha Weerta

---

Weeri had iyo jeer waxa ay leedahay **khobar**.

Kaalay!	khobar
I sii!	layeele + khobar
Sahra baa timid	yeele + khobar

### Khabarka iyo kaalmaha

Khabarku waxa uu lahaan karaa hal ama laba ama saddex jiraale ama oraah-jiraaleed oo waajib/khasab ah.

yimaaddaa + 1 kaalin	qof
cunayaa + 2 kaalmood	qof + wax(cunto)
iibsadaa + 2 kaalmood	qof + wax
siiyaa + 3 kaalmood	qof + qof + wax
geeyaa + 3 kaalmood	qof + wax + meel

Waxa kale oo uu khabarku lahaan karaa oraah-jiraaleed oo ikhityaar ah.

yimaaddaa + 1	qof (+ meel + wakhti + si...)
iibsadaa + 2	qof + walax (+ qof + meel + qiime + wakhti...)

# Noocyada khabarrada

---

## Khabar faleed

Caadi ahaan khabarku waxa uu ka kooban yahay fal.

*Ruqiya shaah baa ay karisay.*

Falka *karisay* waa KHABAR-FALEED.

## Khabar jiraaleed

Mararka qaarkood khabarku waxa uu ka kooban yahay jiraale.

*Sahro waa macallimad. Walaxdani waa maxay? Waa geed. Jaamac waa dukaanle.*

Jiraalayaasha *macallimad*, *geed* iyo magacuyaalka *maxay* waa KHABAR-JIRAALEED.

Substantivet som fungerar som predikat kan ha bestämningar.

*Maroodigu waa xayawaan weyn. Kani waa qolka fadhiga. Kani waa Hodan gurigooda.*

Mararka qaarkood khabarku waxa uu ka kooban yahay falka *yahay/ahaa* + JIRAALE.

*Cali waxa uu ahaa macallin. Adigu ma tahay hooyaday? Anigu waxa aan ahay mas yar. Waxa aan ahay hooyadaa.*

## Khabar sifeed

Mararka qaarkood khabarku waxa uu ka kooban yahay SIFO + falka *yahay/ahaa*.

*Miisku waa yar yahay. Miisku waa uu yaraa. Gabadhu waa ay quruxsan tahay.*

## Kays: summadda yeelaha

---

**-u** (jiraale qodob leh)

*Wiilku moos baa uu cunayaa. Gurigoodu waa uu gubanayaa.*

**-i** (jiraale dheddig ah oo qodob la', sifo, magacuyaal/dibkabe tusmeed)

*Naagi libaax ayaa ay aragtay. Libaax baa naagi aragtay*

*Wiilka yari moos baa uu cunayaa.*

*Kani waa miis.*

*Nimankani odayaal baa ay ahaayeen.*

CODKAC

*Aabbahaa walaalkay baa uu ahaa.*

*Walaashaa hooyaday baa ay ahayd.*

Yeele dulucsan/xoojisan oo leh qurub-diiradeed ma laha summadda yeelaha. Weertuna ma laha magacuyaal yeele. Falka waxa aynu ku isticmaalno qaabka gaaban.

*Wiilka baa moos cunaya.*

*Naag ayaa libaax aragtay.*

*Nimankaas baa odayaal ah.*

*Aabbáhaa ayaa walaalkay ah.*

*Walaáshaa ayaa hooyaday ah.*



## Qurub-weereedyada

---

Qurub weereedyada waa laba nooc:

- Qurub-diiradeedyada: *waxaa, ayaa, baa*.
- Qurubbada nooca weerta: *waa, ma, ha, yaa, sow*.

### Qurub-diiradeedyada baa iyo ayaa

Qurubbadani had iyo jeer waxa ay oraahda diiradaysan ka xigaan dhanka midig.

oraah jiraaleed diiradaysan + *baa*  
oraah jiraaleed diiradaysan + *ayaa*

*ROOB baa shalay da'ay.*

*SAHRO ayaa i raacday.*

*Beerta MUUS baa ka baxay.*

*Cali SHIL ayaa ku dhacay.*

*Dundumooyinka daaraha ka adag ABOOR baa dhisa.*

*Astaanta weydiinta SIDAA ayaa loo qoraa.*

### Qurub-diiradeedka waxaa/waxa

Qurub-diiradeedka *waxa(a)* waxa aynu isticmaalno marka ay oraahda diiradaysani tahay tan ugu dambeeya ee weerta.

*waxa(a)* + KHABAR + oraah-jiraaleed diiradaysan

*Magaalooyinkaas waxaa ka taagan MINNAARADO DHAADHEER.*

*Beerahaas waxaa ka baxa GALLEY, MESEGGO IYO WAXYAALO KALE.*

*Waxaa fasalka soo hor istaagaya CUNUG KALE EE CUSUB.*

*Waxaa uu sawirayaa GURI.*

## Qurub-diiiradeedyada iyo magacuyaal yeele

1. Marka uu yeeluhu diiradaysan yahay, weerta kuma jiro magacuyaal yeele. = Marka aanu weerta ku jirin magacuyaal yeele, oraahda diiradaysani waa yeelaha.

**YEELE diir.** + *baa/ayaa* + ~~magacuyaal-yeele~~ + KHABAR

*SAHRO ayaa cuntay mooska.*

*CALI baa tagay Boosaaso.*

*waxaa* + ~~magacuyaal-yeele~~ + KHABAR + **YEELE diir.**

*Mooska waxa cuntay SAHRO.*

*Boosaaso waxa tagay CALI.*

2. Marka aanay oraahda diiradaysani ahayn yeelaha, waa in uu weerta ku jiro magacuyaal yeele.

**LAYEELE diir.** + *baa/ayaa* + magacuyaal-**yeele** + KHABAR  
**FALKAAB diir.** + *baa/ayaa* + magacuyaal-**yeele** + KHABAR

*Sahro MOOSKA ayaa ay cuntay.*

*Cali BOOSAASO baa uu tagay.*

*waxa* + magacuyaal-**yeele** + KHABAR + **LAYEELE diir.**  
*waxa* + magacuyaal-**yeele** + KHABAR + **FALKAAB diir.**

*Sahro waxa ay cuntay MOOSKA.*

*Cali waxa uu tagay BOOSAASO.*

**FG!!** Keliya marka uu yeeluhu dhex yaallo qurub-diiradeedka iyo khabarka, magacuyaalka yeelaha ahi ma aha khasab.

ORAAH diir. + *baa/ayaa* (+ m.y.) + **YEELE** + KHABAR  
*waxaa* (+ m.y.) + **YEELE** + KHABAR + ORAAH diir.

MOOSKII *ayaa ay Sahro* cuntay.

= MOOSKII *ayaa Sahro* cuntay.

BOOSAASO *baa uu Cali* tagay.

= BOOSAASO *baa Cali* tagay.

Maryan iyo Sudi SIDAAS *baa ay hooyadood* edebta wanaagsan u bartay.

= Maryan iyo Sudi SIDAAS *baa hooyadood* edebta wanaagsan u bartay.

*Waxaa uu reerku* leeyahay WIIL LA YIRAAHDO GUULEED.

= *Waxaa reerku* leeyahay WIIL LA YIRAAHDO GUULEED.

# Oraahyada

---

Qayb waliba ee weertu waxa ay ka koobnaan kartaa hal eray, laba eray ama in ka badan. Qaybahan waxa loo yaqaan **ORAAHYO**.

Oraahyadu waa saddex nooc:

**OM** = ORAAH-MAGACEED = ORAAH-JIRAALEED

**OQ** = ORAAH-QURUBEED

**OF** = ORAAH-FALEED

Weertan waxa ku jira afar oraahood:

*Godka korontadu* ◇ *waxa uu* ◇ *leeyahay* ◇ *dab*.

OM                      OQ                      OF                      OM

OQ-ku iyo OF-ku waa waajib. OM-yadu waa ikhtiyaar.

**Waan** ◇ *arkay*.

OQ              OF

**Cali** ◇ *waa* ◇ *yimid*.

OM      OQ              OF

**Axmed** ◇ *buug* ◇ **buu** ◇ *qoray*.

OM              OM              OQ              OF

**Cali** ◇ *baa* ◇ *adiga* ◇ *kuu soo ordayay*.

OM      OQ              OM                      OF

*Dabadeed* ◇ **waxay** ◇ *gashataa* ◇ *dharkeeda dugsiga*.

OM                      OQ                      OF                      OM

**Bisadda yari** ◇ **waxay** ◇ *raadinaysaa* ◇ *hooyadeed*.

OM                      OQ                      OF                      OM

*Subax walba* ◊ *iyadu* ◊ *waxay* ◊ *aaddaa* ◊ *dugsiga*.  
OM                      OM                      OQ                      OF                      OM

Weeraha amarka ah oo keliya wax oraah-qurubeed ah ma laha.

*Akhri.*

OF

*Akhri* ◊ *qoraalkan*.

OF                      OM

*Magacow* ◊ *saddex cunto*.

OF                      OM

## Dhismaha oraah-magaceedka

### Eray-madaxeed oo keliya

#### JIRAALE

*dal*

#### JIRAALE DIBKABE LEH

*dalka / dalku*

*dalkaas / dalkaasi*

*dalkayga / dalkaygu*

### Eray-madaxeed iyo faahfaahiye

#### JIRAALE + JIRAALE

MADAX + FAAHFAAHIYE

*kubbadda cagta*

*dukaanka dharka*

*saddex bilood*

*carruurta Maryan*

*guriga Axmed*

#### JIRAALE + SIFO

MADAX + FAAHFAAHIYE

*carruurta yaryar*

*sonkor qasabeed*

*hibil lo'aad*

*bisha labaad*

#### JIRAALE + FAL

MADAX + FAAHFAAHIYE

*nin hurdaya*

*carruurta bugta*

### JIRAALE + ORAAH-MAGACEED

MADAX + FAAHFAAHIYE

*madaxweynaha [Jamhuuriyadda Soomaaliyeed]*

*dhismaha [ururka shaqaalaha]*

### JIRAALE + WEER DHIMMAN

MADAX + FAAHFAAHIYE (WEER FAAHFAAHIYEED)

*gabadha [uu Xasan guursaday]*

*ninka [Sanaag ka yimid]*

*laba [caruur ah]*

Attributet pekar på det direkt föregående substantivet.

JIRAALE + SIFO

**kubbad**

*(kubbaddee?)*

weyn

JIRAALE + JIRAALE

**kubbadda**

*(kubbaddee?)*

Sahro



**kubbadda**

*(kubbadda noocce?)*

cagta

## Silsilad faafaahiyeed

Om attributet är ett substantiv kan det i sin tur ha ett attribut.



## Faahfaahiye ku jira dhinaca bidixda

FAAHFAAHIYE + MADAX + DIBKABE LAHAANSHO

Axmed **gurigiisa**

Cali **timirtiisa**

Maryan **hooyadeed**

Maryan → **caruurteeda**

madax: *carruuta*

faahfaahiye: *teeda = Maryan*

badda → **agteed**





## Laba faahfaahiye

### Xiriiriyayaasha 'ee' iyo 'oo'

Två olika attribut som syftar på samma huvudord

Ordet efter **ee** pekar inte på ordet för **ee**, utan det tidigare huvudordet.



dukaanka dharka ee Cali = dukaanka dharka + dukaanka Cali

Konjunktionen 'ee' används före ett definierande attribut.


Konjunktionen 'oo' används före ett beskrivande attribut.

Mellan två adjektiv används därför oftast oo.





### Xiriiriyaha 'iyo'

Två samordnade substantiv som tillsammans fungerar som attribut.



Jämför



The conjunction *oo* is used in order to express additional information that is not crucial for the identification of the person or object that the head noun refers to. We would know who *aabbahay* refers to also without the subclause.

Konjunktionen **oo** används för att ge extra information som inte är nödvändig för att identifiera den person eller det föremål som huvudordet syftar på. Vi skulle veta vem *aabbahay* syftar på även utan bisatsen.

Aabbahay oo Xamar ka yimid baa buuggan keenay.

But when the information in the relative subclause is necessary for us to identify exactly who or what the head noun refers to, then there is usually no conjunction.

Men när informationen i den relativa bisatsen är nödvändig för att vi skall veta exakt vem eller vad som huvudordet syftar på, då används som regel inte någon konjunktion.

Maryan ma arkin daanyeerrada geedaha ku jira.  
daanyeerrada geedaha ku jira.

If such a necessary relative subclause is not the only or first modifier after the head noun, but the second modifier, then the conjunction *ee* needs to be used.

Om en sådan nödvändig relativ bisats inte är det enda eller det första attributet efter huvudordet, då behövs konjunktionen *ee*.

Maxaa ku dhacay labadii bisadood ee hilibka soo xaday?  
labadii bisadood hilibka soo xaday

Waxa aan wax ka bartaa dugsi hoose/dhexe ee Boosaaso ku yaal.  
dugsi hoose/dhexe Boosaaso ku yaal

## Dhismaha oraah-qurubeedka

qurub weereed + magacuyaal yeele

waa	aan
waxa	aad
baa	uu
ayaa	ay
ma	aannu
ha	aynu
yaa	aydin

Diskussion av frasens placering i huvudsats och i bistas.

## Dhismaha oraah-faleedka

1	2	3	4	5	6	7	7+	8	9	10	11	12	13	14
la	i	u	ku	ka	la	ma	aan	kay	soo	kala	ag	ADJ.	VERBS	
	ku						aad	kaa	sii	wada	dhex			
	na						uu	kayo			dhinac			
	ina						ay	keen			dul			
	idin						aannu	kiin			hoos			
	is						aynu				hor			
							aydin				kor			

1. magacuyaalka yeelaha ah ee aan cayinnayn **la**;
2. hal magacuyaal oo layeele ah: **i, ku, na, ina, idin** ama **is**,
3. horyaalaha **ú**,
4. horyaalaha **kú**,
5. horyaalaha **ká**,
6. horyaalaha **lá**,
7. qurub-diidmeedka **má**,
- 7+. magacuyaal yeele ee gaaban (uun haddii uu raacayo qurub-diidmeedka **ma**),
8. magacuyaalka labaad oo layeele ah: **kay, kaa, kayo, keen** ama **kiin**,
9. hal qurub-jiheed: **soo** ama **sii**,
10. hal qurub-jiheed: **kala** ama **wada**,
11. hal qurub-meeleed: **ag, dhex, dhinac, dul, hoos, hor, kor...**,
12. hal sifo;
13. hal ama laba fal oo ku taagan qaabka masdarka, iyo
14. hal fal oo leh dhammaadyada qofka, tirada, amminta iyo habka.

*Dharkeeda waxa qabsan kara dab.*

## Weer fudud iyo weer adag

---

weer fudud = hal khabar

weer adag = in ka badan

### Weero dhimman

waa laba nooc:

weer dhammaystir (komplement till huvudsatsens verb)

weer faahfaahiyeed (bestämning till ett substantiv)

### Weer-dhammaystir

Weer-dhammaystirku waa weer dhimman oo ka bilowda xiriiriyaha 'in'.

Weerta dhimmani waa layeelaha khabarka 'og ahay' ee weer-madaxeedka:

*[In uu imanayo] ayaa aan og ahay.*

*Waxa aan og ahay [in uu imanayo].*

Weerta dhimmani waa layeelaha khabarka 'u malaynayaa' ee weer-madaxeedka:

*[In Xasan uu iman doono] ayaa aan u malaynayaa.*

*Waxa aan u malaynayaa [in Xasan uu iman doono].*

Weerta dhimmani waa yeelaha weer-madaxeedka:

Falka weerta dhimmani waxa uu leeyahay dhammaadka **-aa** haddii weertaasi tahay/ahaato yeelaha weer-madaxeedka.

Waa fiican tahay in uu yimaaddo.

Waa fiican tahay in uu yimaaddaa.

In uu yimaaddaa waa fiican tahay.

Waa run in uu... -o/-aa

Waa xaq in uu... -o/-aa

## Weer faahfaahiyeed

jiraale madaxeed + <<weer faahfaahiyeed>>

Om **bisatsens inte innehåller något subjekt** ska verbet stå i reducerad / kort form och slutar då med kort **-a** i presens.

*Tani waa gabadha <<warqadda qoraysa>>.*

*Tani waa gabadhii <<warqadda qortay>>.*

Om **bisatsens innehåller ett subjekt** ska bisatsens verb stå i presens konjunktiv och sluta på **-o**.

*Tani waa warqadda <<gabadhu qorayso>>.*

*Tani waa warqaddii <<gabadhii qortay>>.*

Oftast använder man ett kort subjektspronomen när bisatsen innehåller ett subjekt.

*Tani waa warqaddii <<ay gabadhii qortay>>.*

*Tani waa warqaddii <<gabadhii ay qortay>>.*

*Tani waa warqaddii <<ay qortay>>.*

Om bisatsen hör till det substantiv som är subjekt i huvudsatsen och bisatsen slutar med ett verb i presens, bör verbet sluta med ett långt **-aa**, inte **-a** eller **-o**. Detta **-aa** fungerar som subjektsändelse.

*Wiilka <<warshadda sonkorta ka shaqeeyaa>> waa kaas.*

*Mooska <<aad cunaysaa>> waa ceeriin.*

Om verbet är **ah** eller **leh** eller en konjunktivform som slutar på **-n / -in / -nin** blir subjektsändelsen **-i**.

*Magaca <<gaarka ahi>> waxa uu had iyo jeer ka bilowdaa xaraf weyn.*

*Inta badan dooxooyinka <<janjeedhka lihi>> waa oomane.*

*Noole <<aan neefsanini>> ma jiraa?*

*Miyay sameeyaan walxaha <<aan noolayni>> jabaq?*

*Faro <<aan dufan lahayni>> wax ma duugaan.*

## Faafaahiye dheeraad ah

---

Adeegsiga xiriiriyaha oo waxa uu muujinayaa in uu faahfaahiyuhu yahay mid dheeraad ah.

*Gabaygan waxa tiriyey Cige Aw Cali oo <<ku dhashay Gobolka Togdheer>>.  
...waxaa taleefan lagu wacay Maryan oo <<Sacdiyo daris la ah>>...*

Man känner redan till vilken person eller vilken sak det handlar om. Informationen i bisatsen behövs inte för att man ska kunna "identifiera" personen eller saken.

Informationen i bisatsen ger ibland också en beskrivning som bara gäller tillfälligt, i en särskild situation. Ofta föregås då bisatsen av ett långt pronomen.

*Si ay u badbaado, qudaar ayay suuqa ku gadi jirtay iyada oo <<gabar yar ah>>.*

*Adiga oo <<tusaha kor ku xusan isticmaalaya>>, isku day inaad miisaanto heestan.*

Även ett ensamt adjektiv används ofta på det här sättet för att uttrycka en tillfällig egenskap.

*Aniga oo fajacsan ayaan aqbalay.*

*Isaga oo faraxsan buu si faan leh iigu yidhi...*

## Weero dhimman oo faafaahiyeed

---

### WAKHTI

### Tidsbisats

### Temporal subclause

*Markii* <<ay i aragtay>> **ayay** ilmaysay.

*Intii* <<aanan u jawaabin>> **ayuu** Cabdi Tahliil i weydiiyey.

**Way** i sugtay *inta* <<aan dhammaysanayo>>.

Hooyo **ayaan** eegay **anigoo** <<dhinac socda>>.

### SHURUUD

### Villkorsbisats

### Conditional subclause

*Haddii* <<aad wax u baahatana>> Nimco **ayaa** lambarkayga haysa.

### OGGOLAANSHO

### Medgivande bisats

### Concessive subclause

*In kasta oo* <<uu Negeeye talada la yaabay>> haddana **waa ay** cajabisey.

*Wax kasta oo* <<uu sameeyaba>> **waxay** isu rogi xumaan.

### SABAB

### Orsaksbisats

### Causal subclause

**Waxa ay** timaaddaa goor hore *iyada oo* <<waxbarashada u diyaar ah>>.

### UJEEDDO

### Syftesbisats

### Final subclause

**Maxaa ay** samayn karaan carruurta *si* <<ay u kaalmeeyaan waalidkood>>?

Waqti fiican waa in aad baxdaa *si* <<aad u gaarto iskuulka>>.



# Weero dhimman ee xiriiriye ka bilaabmaya

---

## WEER DHAMMAYSTIRE

Waqti fiican **waa in** <<aad baxdaa>> si aad u gaarto iskuulka.

## WAKHTI

Sheekadii odayaashu aad **ayay** u dheeratay **ilaa** <<makhribtii la gaaray>>.

## UJEEDDO

Wuxuu wax **u** baranayaa **in** <<uu helo shahaado>>.

# Laba weer-madaxeed

---

Neefta oo dhan **waa** la diisi karaa, **hase yeeshee** adke iyo hoor midna lama diisi karo.

## SABAB

Ganacsigan **waxa** loo yaqaan “Ganacsigii Aamusnaa” **maxaa yeelay** cidna islama hadlin weligeed.

Xirisi **ma** ciyaari karo kubbad **sababta oo ah** lug **ayaa** si xun uga jabay.

Ha tegin hadda, **waayo** **waa** madow.

## BISATSINLEDARE

*som står i början av bisatser*

xiriiriyayaasha

**oo, ee**

**in, ilaa**

jiraalayaasha

**inta, intii, marka, markii, kolka, haddii...**

oraahyada

**in kasta oo, (aniga, adiga) oo ...**

## SAMORDNARE

*som står mellan två huvudsatser*

*(båda huvudsatserna innehåller en satspartikel)*

xiriiriyayaasha

**oo, ee**

**-na, -se, laakiin, waayo, maadaama...**

oraahyada

**sababta oo ah, maxaa yeelay, hase yeeshee, hase ahaatee ...**

## Weer-tebineedyada

---

Weer-tebineedka waa in uu ku jiraa qurub-weereed:

*waa, baa, ayaa ama waxaa.*

Sidoo kale waxa caadi ahaan ku jira magacuyaal yeele:

*aan, aad, uu, ay, la, aannu, aynu ama aydin.*

**Sahro** waa **ay** hadlaysaa.

**Cali** waxa **uu** qoray buuggan.

Buuggan waxa **uu** qoray **Cali** sannadkii 2020kii.

Keliya haddii la diiradeynayo yeelaha weerta, weerta kuma jiro wax magacuyaal yeele ah.

**Sahro** ayaa hadlaysa.

\***Sahro** ayaa **ay** hadlaysa.

**Sahro** baa hadlaysa.

\***Sahro** baa **ay** hadlaysa.

Buuggan waxa qoray **Cali**.

\*Buuggan waxa **uu** qoray **Cali**.

## Weer-weydiimeedyada

---

Weer-weydiimeedka ee jawaabtiisu noqonayso *haa/maya* waa in uu ku jiraa qurub-weereed: *ma, ma+baa, miyaa (< ma+ayaa)*.

Weer-weydiimeed oo diirad la':

*Cali* **ma** yimid?

*Cali* **miyuu** yimid?

*Kabo cusub* **ma** haysaa?

Weer-weydiimedyo oo diirad leh:

**Ma** nabad **baa**?

Nabad **miyaa**?

\*~~**Ma** nabad **ayaa**?~~

Weer-weydiimeedka ee ku jira eray weydiimeed waa in uu ku jiraa qurub-weereed: *waa, baa, ayaa, waxa*.

Eray-weydiimeedyada waa:

- **ayo, maxay, immisa, meeqa,**
- erayo leh dibgalaha **-ee**, sida erayada **xaggee, qofkee, intee, kolkee, sababtee, wakhtigee, xilligee,**
- erayo leh dibgalaha **-ma**, sida erayada **goorma, meelma, kuma, tuma...**

Utan fokus (*waa*):

Taasi *waa* tuma?

*Waa* maxay hadafkaagu?

Med fokus (*ayaa, baa*):

Xaggee *baa* uu tagay? Xaggee buu tagay? Xagguu tagay?

Goorma *ayaa* uu haramcadku seexdaa? Goormuu...

Shalay immisa *ayaa* ay taariikhdu ahayd?

Maanta ma waxa uu tagay suuqa?

Fasalka immisa kursi *baa* yaalla?

Ofta sammandragningar.

Eray-weydiimeed + **magacuyaal yeele** = DIIRAD

Buuggani immisuu joogaa?

= Buuggani immisa *baa* uu joogaa?

Adeegsiga dibgalaha **-ee** keligiis = DIIRAD

Kalluunku xaggee ku badan yahay?

= Kalluunku xaggee *baa* uu ku badan yahay?

Xaggeed ka keentay hilibka?

= Xaggee *baa* aad ka keentay hilibka?

Obligatoriska sammandraningar: *yaa* <\*ayo+baa, *maxaa* <\*maxay+baa

*Yaa* jooga isbitaalka?

*Cali maxaa keenay?*

## Weer-diidmeedyada

---

Waxa jira noocyo badan...

## Weer-tebineedka diidmada ah ee diiradda la'

---

Weer-diidmeedka ee aanu jiraale diiradaysan ku jirin:

*ma* + madhacdo (tagto, joogto, timaaddo)

FUDUD	SOC.	CAAD.
TGT. <i>Cali ma tegin.</i>	<i>Cali ma tagayn(in).</i>	<i>Cali ma tegi jirin.</i>
<i>Cali ma uu tegin</i>		
<i>Cali muu tegin</i>		
<i>Cali ma uusan tegin</i>		
<i>Cali manu tegin</i>		
JGT. <i>Cali ma tago.</i>	<i>Cali ma tagayo</i>	
<i>iyagu ma tagaan.</i>	<i>Iyagu ma tagayaan.</i>	
TMD. <i>Cali ma tegi doono.</i>		
<i>/ ma uu / muu</i>		

Bataatan **ma** tagayn.

Gabi ahaanba **ma** tagayn.

Lagama **yaabo** in uu tago.

Diidmo aan caadi ahayn:

Qurub-diidmeedka *ma* + muy. yeelaha + qurub-diidmeedka *aan*:

*Cali ma uusan tegin.*    *Cali muusan tegin.*    (tagto oo keliya!)

*Ma aysan tegin.*    *Maysan tegin.*

???? Qurub-weereedka *waa* + muy. yeelaha + qurub-diidmeedka *aan*:

*Cali waa uusan tegin.*    *Cali wuusan tegin.*

*Waysan tegin.*



# Weer-tebineedka diidmada ah ee diiradda leh

---

Weer-diidmeedka ee uu jiraale diiradaysan ku jiro:

*aan* + madhacdo 2aad (= tagtada madhacdada)

## Yeele diiradaysan

*Cali baan tegin.* madhacdo fudud

*Cali baan tagayn(in).* madhacdo socoto

qaabkan macnihiisa waa joogto, tagto ama timaaddo !?!

*Cali baan tegi doonin / tegi jirin.* ???????

qurub diiradeed + qurub diidmeed

*baa/ayaa + aan > baan / ayaan*

## Layeele ama falkaab diiradaysan

*Cali mooskii buusan cunin.* *uusan < uu+aan*

*Cali muuskii baanu cunayn(in).* *aanu < aan+uu = aan + isaga*

*Waxaan rabaa in aanu tegin*

*Waxaan rabaa in aannu tagno.* *aannu = annaga*

Magacuyaalka yeeluhu waa waajib! Meesha magacuyaalka yeeluhu waa qurub-diidmeedka *aan* hortiisa amaba dabadiisa.

qurub-diiradeedka + magacuyaalka yeelaha + qurub-diidmeedka

*baa/ayaa + aan/aad/uu/ay... + aan >*

*baanan, baadan, buusan, baysan...*

*ayaanan, ayaadan, ayuusan, ayaysan...*

## AMA

qurub-diiradeedka + qurub-diidmeedka + magacuyaalka yeelaha

*baa/ayaa + aan + aan/aad/uu/ay... >*

*baanan, baanad, baanu, baanay...*

*ayaanan, ayaanad, ayaanu, ayaanay...*



# Weer-weydiimeedka diidmada ah ee diiradda la'

---

Weer-diidmeedka ee aanu jiraale diiradaysan ku jirin:

*miyaan* + madhacdo 2aad (= tagto)

(< ma + aan)

FUDUD

SOC.

~~— *Miyaan* tegin? — *Miyaan* tagayn(in)?~~

*Miyaanu* tegin?     *Har han inte gátt?*

*Cali miyaanu* tegin?     < \**ma+aan+uu*

*Maanu* tegin?

? *Miyaanu* tegin?     + magacuyaal yeele

? *Miyuusan* tagayn(in)?

???? *Miyaanad* tegi jirin?     ??? tagto caadilay

???? *Miyaanad* tegi doonin?     ??? timaaddo

Ma tegi doono miyaa?

Ma aanan tegin miyaa?

Ma aanan tegin (miyaa)?

Ma aadan tegin (miyaa)?

Ma uu tegin miyaa?

Ma uu tegin.

Ma uu tegin, sow ma aha?

Ma uu tegin, ma aha?     n'est-ce pas?

Muu tegin?

# Weer-tebineedka diidmada ah ee diiradda leh

---

Weer-diidmeedka ee uu jiraale diiradaysan ku jiro:

*ma + baan/ayaan* + madhacdo 2aad

AMA *miyaan* + madhacdo 2aad

## Yeele diiradaysan

FUD. *Ma Cali baan* tegin?

*Cali miyaan* tegin?

SOC. *Ma Cali baan* tagayn(in)?

*Cali miyaan* tagayn(in)?

< \**ma+ayaa+aan*

qurub weydiimeed + qurub diiradeed + qurub diidmeed

*ma + baa/ayaa + aan* >

*miyaan*

## Layeele ama falkaab diiradaysan

*Cali ma* mooskii *buusan* cunin?

*Cali* mooskii *miyuusan* cunin?

*Cali ma* muuskii *baanu* cunayn(in)?

*Cali* muuskii *miyaanu* cunayn(in)?

Magacuyaalka yeeluhu waa waajib! Meesha magacuyaalka yeeluhu waa qurub-diidmeedka *aan* hortiisa amaba dabadiisa.

q.-weydiimeedka + q.-diiradeedka + muy. yeelaha + q.-diidmeedka

*ma + baa/ayaa + aan/aad/uu/ay... + aan* >

*miyaanan, miyaadan, miyuusan, miyaysan...*

## AMA

q.-weydiimeedka + q.-diiradeedka + q.-diidmeedka + muy. yeelaha

*ma + baa/ayaa + aan + aan/aad/uu/ay... >*

*miyaanan, miyaanad, miyaanu, miyaanay...*

## Weer-amareedka

---

Weer-amareedka wax qurub-weereed ah kuma jiro.

KELI

*Mooska cun!*

WADAR

*Muusaska cuna!*

Weer-amareedka diidmada ah waxa ku jira qurub-weereedka **ha**. Falku waa qaabka madhacdada tagtada ah (madhacdo 2aad).

KELI

*Mooska **ha** cunin!*

WADAR

*Muusaska **ha** cunina!*

Jfr. ha cuno!

Mooska cuni maysid / ma cunaysid. Negerat progressivt presens

## Weer-rajeedyada (Önske-satser)

---

Weer-rajeedka ee qofka 3aad waxa uu leeyahay qurub-weereedka ha.  
Weer-rajeedka ee qofka 1aad ama 2aad waxa uu leeyahay magacuyaalka yeelaha uun. Qaabka yeelaha waxa weeye midka caadiga ah ama mid gaaban: *aan/an, aad/ad*.

Falku waa qaabka madhacdada. Inta badan dibgalaha wadarta *-aan* waxaa loo beddelaa dibgalaha *-een*.

*Aan wax sheego!*

*(Aad sheegto runta!) Sheeg runta! Waa in aad sheegto runta!*

*Ha sheego runta!*

*Ha sheegto runta!*

*Aan wax sheegno!*

*(Aad sheegteen/(sheegtaan) runta!) preteritum-betydelse!*

*Sheega runta! Waa in aad sheegtaan runta!*

*Ha sheegeen/sheegaan runta!*

Weer-rajeedka diidmada ah waxa ku jira qurub-weereedka *yaa*.  
Falku waa qaabka madhacdada 2aad (madhacdada tagtada ah).

*Yaanu sheegin runta!*

*Yuusan sheegin runta!*

q.-rajeedka diidmada *yaa* + muy. yeelaha + q.-diidmeedka *aan*  
*yaa + aan/aad/uu/ay... + aan >*

*yaanan, yaadan, yuusan, yaysan...*

### AMA

q.-rajeedka diidmada *yaa* + q.-diidmeedka *aan* + muy. yeelaha  
*yaa + aan + aan/aad/uu/ay... >*

*yaanan, yaanad, yaanu, yaanay...*



# Codaynta

## 22 shibbane

		frikativ	explosiv	nasal	tremulant
		affrikat	approx	lateral	
underläpp	+	överläpp		b w m	
underläpp	+	övertänder	f		
tungspets	+	övertänder		d, t	
tungspets	+	tandvall	s		n l r
tungspets	+	främre gom		dh	
tungblad	+	främre gom	sh		
tungrygg	+	främre gom	j		
tungrygg	+	mellangom		y	
tungrygg	+	bakre gom		g, k	
tungrygg	+	tungspene	kh	q	
tungrot	+	svalg	c, x		
stämband			h	'	

## Shibbanayaasha fudfudud iyo kuwa xoogga leh

	FUDUD	XOOG LEH
b / bb	[β] ja <b>ban</b>	[b] Jab <b>bu</b> uti
d / dd	[ð] ba <b>dan</b>	[d] ba <b>dd</b> an
g / gg	[ɣ] dee <b>ga</b> anka	[g] de <b>gg</b> an yahay
l / ll	sa <b>la</b> an -ta	sa <b>lla</b> an -ka
m / mm		mm
n / nn	an <b>iga</b>	an <b>na</b> ga, in <b>na</b> ga
	aan <b>u</b> < *aan+uu	aan <b>nu</b> = annaga
r / rr	Car <b>ab</b> -ta	car <b>ra</b> b -ka
	war <b>an</b> -ka	iska war <b>ra</b> n
dh	ad <b>hi</b>	gab <b>ad</b> ha < *gab <b>adh</b> +ta

## 10 shaqal

5 shaqal oo fudud (a, e, i, o, u) iyo 5 shaqal oo culus (ä, ë, ï, ö, ü)

10 shaqal oo gaaban + 10 dheer = 20 shaqal

FUDUD	CULUS	FUDUD	CULUS
gabar danab a	gämbär Æ	gaaban  aad (=adiga) daar	wänääg äädäyää libäax ääd (=in badan) dääl
dhex		beerta heesta shabeelka	gëedkä gëeskä gëelä
	dibigä	diinta liinta	düinkä füdkä jüirkä düirkä
oday	tög fög ölöl ög	doodda koobka roobka	röötigä jöögää döödayää märöödigä bänöönigä
	Ürdün gübää	uunsi Nuur carruur	Lüül

## 5 (?) difton

	fudud	culus
ay/ey		
aw/ow		
oy	——	qoys, hoy

## Codkac

Lång vokal = två vokalpositioner

Maskulina substantiv oftast hög ton på NÄST SISTA vokalpositionen.

Feminina substantiv oftast hög ton på SISTA vokalpositionen.

LAB	DHEDDIG
ínan	inán
kóob	seéf
baaskíil	liín

Ibland grammatisk skillnad

HAL	IN BADAN
árday (-ga)	ardaý (-da)
Soomaáli (-ga)	Soomaalí (-da)
baabúur (-ka)	baabuúr (-ta)

Ibland olika ord med olika betydelse

áfartan (4)	afártan (40)
béer (-ka)	beér (-ta)

Men om man studerar hela satser så är hög ton ganska komplicerat och inte så mycket utforskat. T.ex.

– Substantiv har hög ton.

– Enkla verbformer (qaab fudud) har inte hög ton.

*Má yimid?*

– Progressiva verb har hög ton.

*Cali wuu imánayaa.*

– Subjekt utan bestämd artikel och utan fokus har inte hög ton.

*Cali wúu yimid. Cali wáa uu yimid.*

– Subjekt med fokus har hög ton.



*Cá*li baa yimid.

Wáxa yimid *Cá*li.

– Prepositionerna har alltid hög ton före verb

*Cali wuxuu ká* yimid tuuláda. (eller *wú*xuu)